Disability Rights OHIO

Waxaan leenahay xaqa sharciga ah.

# **MEDICAID:** Ereybixinta Erayada Caadiga Loo Isticmaalo

**Barnaamijka Adeegyada Isku-xiran** - barnaamijka caafimaadka iyo badqabka oo ilaaliya xubnaha isticmaala adeegyo ka badan intii laga filayey inay isticmaalaan. Xubnaha ku jira Barnaamijka Adeegyada Isku-dhafan ayaa loo qoondeeyey waana inay isticmaalaan bixiyeyaasha loo qoondeeyey adeegyada daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan dawooyinka dhakhtarka qoro. Waxaad ku jiri kartaa barnaamijkan haddii aad ka hesho daawooyinka la xakameeyo farmashiyeyaal iyo/ama daawo-qorayaal badan. Haddii aadan hubin inaad kku jirto barnaamijkan, la xiriir caymiska daryeelkaaga la maareeyo ama kala xiriir khadka telefoonka Medicaid ee 800-324-8680. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa shabakada Waaxda Ohio ee Medicaid: **https://www.ohiomh.com/resources/coordinatedservicesprogramfaq**.

**Baaritaanka Hore & Baaritaanka Wakhtiyeysan, Adeegyada Baarista Iyo Daaweynta (EPSDT)** – barnaamijka caafimaadka ilmaha ee Medicaid ee loogu talagalay inuu daboolo baahiyaha caafimaadka jireed, maskaxeed iyo caafimaadka korritaanka ee carruurta da'doodu ka yar tahay 21 jir. Gudaha Ohio, barnaamijka EPSDT waxaa loo yaqaan Healthchek.

**Bixiye** – qof ama xarun bixisa daryeel caafimaad, sida dhakhtar, farmashiiye, dhakhtarka ilkaha, rug caafimaad, isbitaal, dhakhtarka jirka, kalkaalisada ama kaaliyaha

**Khidmadda adeegga (FFS)** - hab qadiimi ah oo loo bixiyo lacagta adeegga caafimaadka taasoo bixiyeyaasha loo siiyo lacagta adeegyo kasta ee ay bixiyaan. Bixiyuhu badanaa wuxuu u gudbiyaa biilasha Waaxda Medicaid ee Ohio si loogu magdhawo. Dadka helo khidmadda adeegga ee adeegyada caafimaadka ma laha caymiska daryeelka la maareeyo.

**Dib loo soo-celiyay** – la soo celiyay, dib loo bilaabay ama dib loo bilaabay

**Racfaan degdeg ah** – racfaan la go'aamiyo/xaliyo muddo gaaban

**Disability Rights Ohio**
200 Civic Center Dr.
Suite 300
Columbus, Ohio 43215-4234

614-466-7264 or 800-282-9181
**FAX** 614-644-1888
disabilityrightsohio.org

**Ohio Disability Rights Law and Policy Center, Inc.**

**Racfaanka** – codsiga ah in la helo go'aan ku saabsan adeegyada Medicaid ee dib u eegista qof leh awood dheeraad ah oo ku saabsan xaalad. Tusaale ahaan, hay'ad ama caymiska daryeelka la maareeyo ayaa kuu sheegi kara in ay doonayso inay yareyso ama joojiso adeegyadaada kaaliyaha ama kalkaalinta, ama waxay diidi kartaa codsigaaga adeegyada ama qalabka (sida gura-guraha ama qalabka la qabsasho ee kale). Waxaad guud ahaan xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadatid go'aannadan.

**Sabab la taaban karo** – sabab sharaxaysa waxa aadan u lasimin kamadambeysta ama aadan u aadin dacwad dhageysiga. Tani waa inay ahaataa dhimasho qof kuu dhow, xanuun ama jirro degdeg ah oo ku dhacda qofk ama xubin qoyska qofka u dhow, ama xaalado kale oo sida macquulka ah ka reebtay ka qaybgalka dacwad dhageysiga gobolka.

**Socoshada macaashka (sidoo kale loo yaqaano sii wadista taageerada ama adeegyada sii socda)** – awoodda aad u leedahay in aad sii haysato adeegyadaada ilaa inta go'aan kamadambeys ah laga gaarayo, haddii aad gudbiso codsi rafcaan mudada saxda ah gudaheeda, iyada oo leh qaar ka reeban\

**Cabasho** – cabasho ku aadan caymiska daryeelka la maareeyo, dhakhtar ama wax kasta oo aan ahayn tallaabo ay qaadeen caymiska. Cabashooyinka waxaa ku jiri kara arrimaha la xiriira tayada daryeelka ama adeegyada la bixiyey; qaybaha xiriirada dadka ka dhexeeyo sida anshax-xumada bixiyaha ama shaqaalaha; ama ku guuldareysiga ixtiraamka xuquuqda xubinta.

**Caymiska daryeelka la maareeyo** – shirkadaha caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay oo qandaraas la leh gobolka Ohio oo masuul ka ah qabanqaabada iyo daboolista dhammaan adeegyada daryeelka caafimaadka la bixiyo iyadoo loo marayo Medicaid-ka qadiimiga ah loogu talagalay xubnahooda

**Caafimaad ahaan loo baahan yahay** - Lama-huraanka caafimaad waa fikrad aasaasi ah oo hoos imaaneysa barnaamijka Medicaid. Qeexidda waxay ku xirantahay barnaamijka:

1. **Lama-huraanka caafimaad loogu talagalay shaqsiyaadka ee ay daboolaan baaritaanka hore & baaritaanka wakhtiyeysan, adeegyada baarista iyo daaweynta (EPSDT)** waxaa lagu qeexaa sida habraacyada, alaabta ama adeegyada lagaga hortaggo, baaro, qiimeyo, saxo, hagaajiyo ama daweeyo xaalad caafimaad oo xun, sida jirro, dhaawac, cudur ama calaamadaheeda, cillado dareen ama dabeecad, naafonimo maskaxeed, caqli dhantaalan, ama naafonimada korriinka.
2. **Lama-huraanka caafimaad loogu talagalay shaqsiyaadka ee ay daboolin EPSDT** waxaa lagu qeexaa sida habraacyada, alaabta ama adeegyada lagaga hortaggo, baaro, qiimeyo, saxo, hagaajiyo ama daweeyo xaalad caafimaad oo xun, sida jirro, dhaawac, cudur ama calaamadaheeda, cillado dareen ama dabeecad, naafonimo maskaxeed, caqli dhantaalan, ama naafonimada korriinka iyo kuwaasoo la'aantooda

la filanayo in qofka inuu ku dhaco xanuun dabo-dheeraada ama ka sii darayo ama cudduro cusub; dhantaalka waxqabadka; cillada xubin ama qayb jirka ah; ama xanuun weyn iyo raaxodarro.

**Geedi-socodka dacwad dhageysiga gobolka** – habka rasmiga ah ee gobolka Ohio u oggolaado in dadka ay ka doodaan go'aanada laga gaaray adeegyada Medicaid iyada oo loo marayo racfaan. Dacwad dhegeysiga gobolka waa kulan adiga uu kula yeelanayo, qof ka socda hay'adda deegaanka, iyo sarkaalka dacwad dhageysi ee Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Ohio (Ohio Department of Job and Family Services, ODJFS). Kulanku wuxuu noqon karaa mid wicitaan ama qof ahaan. Qofka ka socda hay'ada degaanka ayaa kuu sharxi doona ficilka ay qaadeen ama rabaan inay ka qaadaan kiiskaaga. Kadib, waxaad fursad u heli doontaa inaad sheegto sababta aad u maleyneyso in ficilku khaldan yahay. Sarkaalka dacwad dhegeysiga ayaa dhageysan doona adiga iyo hay'adda deegaanka waxaana laga yaabaa inuu ku waydiiyo su'aalo ka caawiyo in la ogaado dhammaan xaqiiqooyinka. Sarkaalka dacwad dhegeysiga wuxuu dib u eegi doonaa xaqiiqooyinka lagu soo bandhigay dacwad dhageysiga wuxuuna ku talin doona go'aan ku saleysan in sharciyada si sax ah loogu adeegsaday kiiskaaga ama in kale.

**Go'aanka diidmada macaashka** - go'aanka caymiska daryeelka la maareeyo ku gaareen inaysan adiga ku siin adeegyo. Tani waxay noqon kartaa (1) diidmo ama oggolaansho xaddidan oo ah adeeg la codsaday; (2) dhimista, istaajinta, ama joojinta adeegyada; (3) diidmada bixinta lacagta adeegga; (4) ku guuldareysiga bixinta adeegyada waqti go'an; (5) ku guuldareysiga talaabo qaadida wahkhti go'an gudahiisa; ama (6) diidmada codsiga looga doodayo mas'uuliyada maaliyadeed, sida wadaagidda kharashka, lacag bixinta, lacagta caymiska, ka jarista, caymiska iyo masuuliyadaha kale ee maaliyadeed ee xubnaha.

**Go'aanka racfaanka** – go'aanka ay gaareen caymiska daryeelka la maareeyo ee ku saabsan racfaanka

**La dhimay** – la yareeyay ama waxoogaa yar

**Lacagta caymiska** – Lacagta Medicaid ee loo isticmaalo in dadka naafada ah iyo dadka xaaladaha raagay in ay ku helaan daryeelka gudaha guryahooda iyo bulshadooda halkii laga ay ku heli lahaayeen xarumaha daryeelka muddada dheer, isbitaallada ama xarumaha daryeelka dhexe.

**Muddada oggolaanshaha** – dhererka waqtiga uu camiska daryeelkaaga la maareeyo ama Waaxda Medicaid ay ogolaatay in ay daboosho adeegyada u baahan oggolaansho hore. Haddii aad u baahan tahay inaad sii wadato adeegyadan ka dib marka muddada oggolaanshaha dhamaato, waa inaad badanaa soo gudbisaa codsiga oggolaansho hore.

**Hay’adda maareynta kiisaska lacagta caymiska** – hay’adda qiimeysa baahidaada, waxay kaa caawineysaa sameynta qorshe daryeel oo kuu gaar ah iyo isu-duwidda adeegyada lacagta caymiska

**Oggolaansho hore** – nidaam dhakhtarkaaga ama bixiyahaaga isticmaalo si aad u hesho oggolaanshada adeegyada ka hor intaadan helin

**Ogeysii** – u sheegida qof wax, sida caadiga ah qaab rasmi ah ama toos ah. Marka caymiska daryeelka la maareeyo ama hay’adaha kale ay gaaraan go’aanoku saabsan adeegyadaada Medicaid, waa inay mararka qaarkood ku siiyaan macluumaad qoraal ahaan. Warqada waxaa loo yaqaan ogeysiin.

**Ogeysiin** – warqad qeexaysa tallaabooyinka la qaaday ee adeegyadaada, sababaha looga qaaday, iyo xuquuqdaada in aad racfaan ka qaadato go’aanka.

**U baahan** – loogu baahan yahay ujeeddo gaar ah